

War murtiyeed ka shirka wada tashiga ee ka socdev Magaalada
Baydhabo 17-20 Seetember 2013.

Shirka wadatashiga ee ay isugu yimaadeen Xildhibaanada Qowmiyadda Digil & Mirifle, Madax dhaqameedyo kasoojeeda Qowmiyadda, Madaxda Gobolka iyo kan Degmada Baydhabo, Ururada Bulshada, Hawenka, Ganacsato, Saraakiisha, Qurbajoogta, Ciidamada qalabkasida iyo Culamaa'udiinka oo ay kaga arinsanayeen arimaha la xiriira siyaasada Dalka gaar ahaan dhisida Maamullada Degmooyiinka iyo Gobollada iyo dhismaha Dawlad Goboleedka 6- Gobol ee Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Shirkan oo socday mudo afar maalmood waxaa gunaanadka shirka goobjoog ka ahaa Guddomiyaha Golaha Shacabka ahna Kusimaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Muxammed Sh. Cusman "Jawaari" iyo Wasiiro kasoo jeeda Qowmiyadda Digil iyo Mirifle

Doodiyo falanqeen dheerka dib, waxa shirka wadatashiga la iskuraacay qodobaddan:

1. In sibuuxda lootaageero midnimada qaranka xabsami u federaaleyn ta dalka iyo difaaca gobannimada Dastuuriga ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.
2. In la dhiso Dawlad Goboleed ka kooban lixda Gobol kuwaasoo kala ah:
Shabeellada Hoose, Baay, Bakool, Gedo, Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose. Sida ugu dhaqsiyaha badana loo dar-dargaliyo dhisida Dawlad Goboleedka Koonfur Galbeed.
3. In heshiiska Xukuumada Federaalka Soomaaliya ay la gashay Ergadda ka socotay Kismaayo ee ay kula gashay magaalada Addis Ababa bishii September 3, 2013 uu yahay mid aan marnaba la aqbali Karin, kaasoo
27 Agosto

ah mid aan waafaqsaneyn Dastuurka iyo Shuruucda Dawladda Federaalka ee Soomaaliya, islamarkaana Xuquuq-duudsi barer ku ah Shacbiga Deegaanada Gobolada Jubbada Hoose, Jubbada Dhexe iyo Gedo. Sidaa daraadeedna si toos ah loo diido Xukuumaddana lagula taliyo in ay dib ugu fiirsato.

4. In beesha Caalamka iyo Dowldaha deriska ah ee goobjooga ka ahaa gorgortanka heshiiskan kor ku xusan waxaa laga codsanayaa iney fiiro gaar ah u yeeshaan baaqa Qowmiyada iyo iney dib-u-eegis ugu noqdaan heshiiskan oo aan ka turjumeyn in xuquuqda Dadka deegaanka.
5. In Odayaasha dhaqanka iyo xildhibaanada qaranka iyagoo kaashanaaya Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Ururada Bulshadarayidka ah, Shacbiga deegaanka guudahaan inay dedijiyaan hirgelinta dhisida Maamullada heer Degmo, heer Gobol iyo hirgilinta maamuuska gogosha kafidsan magaalada Baydhabo oo loogu golleeyahay dhisida Dawlad Gobolleeda 6-da Gobol ee Koofur Galbeed ee Soomaaliya;
 - A. In ay u horseedaan sidii ay uga soo qaybgeli lahaayeen dhammaan Beelaha degaan wadaaga la ah Digil iyo Mirifle ee degan lixda Gobol ee Koonfur Galbeed ee Soomaaliya;
 - B. Dhismaha Dawlad Goboleedka waxaa lagu dhisi doonaa si waafaqsan Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo rabitaanka shacabka;
 - C. In Dawlada Federaalka Soomaaliya ay si buuxda oo sharciga waafaqsan u qaadato doorka kaga aadan dhisidda Maamullada iyo D/Goboleedyada oo ay ka mid yihiin taakuleyn ilaalinta xasilooniда iyo fududeynta hawlaha;
 - D. Doorka Xildhibaanada Degaanka waa mid waafaqsan Qodobka 61 ee Dastuurka;

- E. In si deg deg ah loo dhiso Maamuladda Degmooyiinka iyo Gabolada siwaafaqsan Dastuurka iyo Sharciga dhisida Maamullada Degmooyinka iyo Gobolada ee uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Ansixiyey Taariikhdu markey aheyd 8 July 2013 iyadoo dhismaha Maaamullada laga soo bilaabaayo Degmooyiinka Gobolka Shabeelada Hoose.
6. Waxaa laga codsanayaa dhamaan Qurba joogta ka soo jeeda beelaha u dhashay Gobolladan kor ku xusan gaar ahaan iyo guud ahaan dhamaan muwaadiniinta Soomaaliyed ee gardarro diidka ah ay si wadajir ah ugu duubtaan difaaca xuquuqda shacbiga heshiiska Addis Ababa lagu dulmay.
7. Gebagebada shirka wuxuu ka codsaday Madaxda Qaranka oo ugu Horeeyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo R/Wasaaraha Xukuumadda iney Dalka ku hogaamiyaan Dastuurka Federaalka iyo Shuruueda Dalka u degsan.

WabillahiTawfiiq

Baydhabo, 21 September 2013